



Buugga Xeerka iyo Nidaamka Ee Waaxda Booliska Minneapolis

Tirada:
5-100

Cadadda Shanaad - Xeerka Anshaxaa iyo Isticmaalka Xoogga

Xeerka Anshaxaa

5-102

Anshaxaa Xirfadeed

(09/26/22) (01/30/23)

Dib u eegis lagu sameeyay xeerkii hore: (10/20/88) (05/05/89) (10/18/92) (02/28/93) (04/01/93) (10/28/94) (01/10/97) (03/21/97) (03/12/99) (01/05/00) (01/26/05) (04/01/05) (05/03/05) (09/07/05) (05/23/07) (12/14/07) (03/25/08) (04/23/10) (11/15/13) (11/17/15) (01/05/16) (07/28/16) (06/18/18) (06/16/20)

III. Nidaamyada/Xeerarka

C. Eex la'aanta (Mabda'a Saddexaad)

Shaqaaluhu waa inay waajibaadkooda gutaan oo ay sharciga ku dhaqmaan si dhexdhedaadnimoo ah oo aan eex iyo takoor lahayn.

1. Sababta

Wax ku oolnimada sharci fulinta waxay u baahan tahay aaminaadda iyo kalsoonida dadweynaha. Bulshooyinka kala duwani waa inay ku kalsoonaadaan caddaaladda iyo dhexdhedaadnimada booliskooda. Shaqaaluhu waa in ay ka fogaadaan in ay abuuraan is-qabqabsi ku salaysan kala duwanaanshiyaha bulshadooda oo ay gutaan waajibaadkooda iyada oo aan loo eegin jinsiyad, qowmiyad, midab, asal qaran, abtirsiiy়o, heerka socdaalka, aqoonsiga jinsiga ama muujinta, da'da, caqiidada, diinta, nooca galmaada, heerka guurka, heerka waalid, naafanimo (ay ku jirto uurka), xogta hidda-socodka, heerka mujaahid, heerka la xidhiidha kaalmada dadweynaha, iyo xaalad kasta oo kale oo dabaqad la ilaaliyo oo hoos timaada sharciyada gobolka, federaalka, iyo deegaanka.

2. Xeerarka

- a. Shaqaaluhu waa inay siiyaan qof kasta oo bulshadeena ka mid ah adeegyo sharci-fulin xirfadeed, wax ku ool ah oo hufan.
- b. Shaqaaluhu waa in aanay u oggolaan sharci fulinta ama go'aannada rasmiga ah in ay saameyn ku yeeshaan isir, qowmiyad, midab, asal qaran, abtirsiiy়o, xaaladda socdaalka, aqoonsiga jinsiga ama muujinta, da'da, caqiidada, diinta, nooca galmaada, xaaladda guurka, heerka waalid, naaf (oo ay ku jirto uurka), macluumaadka hidda-socodka, heerka halyeeysa, xaaladda la xiriirta kaalmada dadweynaha, iyo xaalad kasta oo kale oo la ilaaliyo oo hoos timaada sharciyada gobolka, federaalka, iyo maxalliga ah (sida waafaqsan P&P 5-104 eex la'aanta iyo Booliska Xirfadlaha).

Error! Reference source not found.

Bogga 2 of 2

- i. Shaqaaluhu waa in aanay jodhs ahaan u soo bandhigin shay loo qaadan karo takoor, sharaf dhac, ama eex ku saabsan sifooyinka kor lagu sheegay, gudaha ama hantida Magaalada. Qalabkan waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, jadwaladaha, kartoonnada, iyo boodhahdha.
- ii. Shaqaaluhu waa in aanay isticmaalin erayo takoor ah, meel ka dhac ah ama eex ah oo ku saabsan sifooyinka kor lagu sharaxay.
- iii. Qalabka dhijitaalka ah waxaa daboolaya P&P 5-107 iyo Xeerka Isgaarsiinta Elektarooniga ah ee Magaalada.